# FAALO
## SHARCI

Sharciga Kaalmo-Sharciyeedka Soomaaliya:
Qaab-dhismeedka, Daldaloollada,
iyoTalosoojeedin

DECEMBER 2025

independencehouse

## Contents

1. **Hordhac** ........ 3
2. **Muhiimadda sharcigan iyo duruufaha dalka ka jira** ........ 3
3. **Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga** ........ 4
4. **Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga** ........ 6
5. **Gunaanad iyo Talo-soojeedin** ........ 8

## 1. Hordhac

Horraanta bisha Nofeembar 2025, Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu ansixiyey Hindise-sharciyeedka Kaalmo-Sharciyeedka JFS, kaas oo ay soo gudbisay Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Xukuumadda JFS. Hindisahan waxa uu haatan sugayaa saxiixa Madaxweynaha, waxaana marka uu Madaxweynuhu saxiixo oo lagu soo saaro faafinta rasmiga ah uu noqon doonaa sharci si buuxda uga dhaqangala dalka oo dhan, laguna maamula bixinta, isku-duwidda iyo habraacyada adeegyada kaalmo-sharciyeedka.

Faalladan waxay falanqeyn iyo qiimayn ku samaynaysa qodobada muhiimka ah ee sharciga, iyada oo u aragta inuu yahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhinaca ballaarinta helidda adeegyada cadaaladda, gaar ahaan dadka nugul, dadka la haybsooco, iyo kuwa aan awoodin inay iska bixiyaan adeegyada sharci ee muhiimka ah. Si kastaba ha ahaatee, sharcigan waxaa ka muuqda cillado iyo daldaloollo waaweyn oo haddii aan la sixin ay wiiqi karaan ujeeddada guud ee sharciga iyo awoodda uu u leeyahay in uu wax ka beddelo caqabadaha hortaagan helitaanka caddaaladda ee Soomaaliya.

## 2. Muhiimadda sharcigan iyo duruufaha dalka ka jira

Kaalmo-sharciyeed (legal aid) waa laf-dhabarta ballaarinta iyo xaqiijinta helitaanka caddaaladda, gaar ahaan marka laga hadlayo bulshooyinka nugul ee lamid ah xaaladda Soomaaliya. Saboolnimada baahsan, colaadaha, shaqo la'aanta, iyo wacyiga sharci ee bulshada oo liita waxa ay si wadajir ah uga qeybqaataan helid la'aanta adeeg cadaalad ha ahaado latalin sharci ama matalaad maxkamadeed. In kasta oo Dastuurka Kumeelgaarka ah ee JFS[1] uu dammaanad qaadayo in muwaadiniintu helaan adeeg sharci iyo difaac lacag la'aan ah oo ay dowladda bixiso, haddana xaqiijinta adeeggan wali waa mid aad u adag.[2] Ma jiro sharci gaar ah oo si buuxda u dejinaya habraacyada, shuruudaha iyo qaab-hawleedka lagu hirgelinayo kaalmo-sharciyeedka, marka laga reebo qodobo kooban oo ku jira Xeerka Habka Ciqaabta[3] iyo xeerarka nidaamka garsoorka.[4]

Warbixinno iyo daraasado muhiim ah oo laga sameeyay Soomaaliya ayaa si cad u muujinaya in caqabadaha helitaanka caddaaladda ay salka ku hayaan tabar-darrada hay'adaha garsoorka iyo adeegyada dadweynaha ee la xiriira dacwadaha. Tusaale ahaan, Istiraatiijiyadda bahda cadaaladda Soomaaliya *2025 – 2029* waxaa lagu xusay in shacabka badankood aysan awoodin inay bilaabaan ama iska difaacaan dacwad, sababa la xiriira kharashaadka maxkamadaha oo aad u sarreeya, gaabiska hannaanka garsoorka

---

[1] Qodobka 34 faqrada 4aad, Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, 2012

[2] World Bank and United Nations Assistance Mission in Somalia (UNSOM), Somalia Security and Justice Sector Public Expenditure Review, Report No. AUS8353 (Washington, D.C.: World Bank, January 2017).

[3] Qodobka 15 Iyo 16, Xeerka Habka Ciqaabta, Sharci Lr 01, 1963.

[4] Qodobka 14aad, Xeerka Nidaamka Garsoorka, Sharci Lr 03, 1962.

oo waqti badan qaata, iyo fogaanta xarumaha adeegga oo ka dhigaya in adeegyada cadaaladda aysan gaari karin bulshada deegaanada fogfog, iyaga oo ah kuwa ku kooban magaalooyinka waaweyn.[5]

Duruufahaas adag awgeed, Sharciga kaalmo-sharciyeedka wuxuu qaadan karaa door wax-ku-ool ah oo lagu yareynayo culeyskaas, isla markaana lagu dhisayo nidaam taageera dadka nugul. Sharcigan waxa uu ujeedkiisu yahay inuu abuuro hannaan lagu mideynayo adeeg-bixiyeyaasha kaalmo sharciyeedka, lagu maareeyo habraacyada iyo shuruudaha bixinta kaalmo sharciyeed, laguna dhiso nidaam la isku halleyn karo oo ka jawaaba baahida muwaadinka. Haddii si wanaagsan loo hirgeliyo, sharcigan wuxuu noqon karaa aalad muhiim ah oo kaalin muuqata ka qaadata dhisidda nidaam caddaaladeed oo loo wada siman yahay, islamarkaana xoogga saaraya ilaalinta xuquuqda dadka saboolka ah iyo kuwa nugul.

## 3. Qodobada ugu muhiimsan ee Sharciga

Sharciga Kaalmo-Sharciyeedka JFS waxa uu ka kooban yahay lix cutub iyo 42 qodob, kuwaas oo dejinaya qaab-dhismeedka nidaamka kaalmo-sharciyeedka dalka. Cutubka 2aad iyo 3aad ee sharcigu waxa ay qeexayaan ujeeddada sharciga, macnaha kaalmo-sharciyeedka, iyo mabaadi'da hagta bixinta adeegga, gaar ahaan mabaad'ida takoor-la'aanta, waqtiga ugu habboon adeegga iyo mudnaanta bulshada inteeda nugul.

Sharciga, qodobkiisa 8$^{aad}$, waxa uu kaalmo-sharciyeed u kala qaybinayaa laba heer:

1. kaalmo asaasiga ah (Primary legal aid) oo qof walba, haddii uu codsado, la siin karo talo sharci, wacyigelin, caawimaad qoraal sharci, iyo xalinta khilaafaadka ee aan maxkamad la xiriirin; iyo
2. kaalmo heer labaad (secondary legal aid) oo loogu talagalay dadka aan awoodin kharashaadka qareennada, taas oo lagu siinayo matalaad iyo difaac maxkamadaha hortooda, gaar ahaan dacwadaha ciqaabta, madaniga iyo maamulka.

Sharcigu waxa uu waajibinaya in macluumaad la xiriira helidda kaalmo sharciyeed laga heli karo saldhig boolis kasta, xarun hayn (detention center), dhisme Maxkamad ama Xabsi iyo wargelinta dadka u baahan kaalmo-sharciyeedka goob walba.[6] Cutubka 3aad ee sharcigu waxa uu diiradda saarayaa cidda bixin karta adeegga kaalmo-sharciyeedka, isaga oo u oggolaanayo in adeeggan ay bixiyaan, qareennada, kaaliyayaasha qareennada, layli qareen, ururrada aan-dawliga ahayn, xarumaha sharci ee Jaamacadaha (legal clinics), odayaasha dhaqanka iyo shakhsiyaad kale oo

[5] *Justice Sector Strategy for Somalia 2025–2029*.

[6] Qodobka 7aad

dhammaantood u baahan oggolaansha iyo idinka (accreditation) Guddiyada Kaalmo Sharciyeedka

**Cutubka 4aad ee sharciga** waxa uu dhisayaa laba heer oo guddi ah: Guddiga Kaalmo-Sharciyeedka Federaalka[7] oo ka kooban sagaal xubnood oo ka kala socda hay'ado dowladeed iyo kuwa bulshada rayidka, iyo guddiyada heer dowlad-goboleed iyo Gobolka Banaadir[8] oo ka kooban min shan xubnood. sharcigu waxa uu siinayaa labada heer awoodo aad isugu dhow oo la xiriira dejinta siyaasadda iyo qaabdhismeedka kaalmo sharciyeedka, fulinta iyo kormeerka adeegga, aqoonsiga bixiyeyaasha adeegga, tababarka shaqaalaha, iyo diyaarin warbixinno sanadeed, isaga oo ujeedku yahay in Guddi walba heerkiisa uu ka qabto hawlaha iyo waajibaadka ku xusan sharciga.[9] Sharciga waxa uu labada guddi u qaabeynayaa qaabdhismeed isku eg oo aysan jirin farqi u dhaxeeya labada heer haba yaraatee. [10]

**Cutubka 5aad** ee sharciga waxaa lagu qeexay fulinta adeegga kaalmo sharciyeedka iyo hirgalinta xafiisyada kaalmo-sharciyeedka, oo ay ku jiraan Xafiis heer Federaal ah iyo xafiisyada Dowlad-goboleedyada. Sharciga waxa uu sidoo kale qeexayaa shuruudaha iyo kaalinta hay'adaha bixiya kaalmo sharciyeedla.

**Dhanka maaliyadda iyo maalgelinta adeegga[11]** kaalma sharciyeedka, sharcigu waxa uu sameynayaa Sanduuqa Kaalmo-Sharciyeed, kaas oo noqon doona sanduuqa maalgelinta nidaamka. Sanduuqan waxaa ansixin doona Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS, waxaana uu dhaqaale kaheli doonaa miisaaniyadda dowladda, deeqo gudaha iyo dibadda ah iyo tabarucaad, waxaana loogu talagalay in lagu bixiyo kharashaadka adeegyada kaalmo-sharciyeedka ee ay qabtaan Guddiyada.

Gebogabadii, 42 qodob iyo lix cutub oo uu ka koobanyahay sharciga, waxa ay si guud ujeedkoodu yihiin abuuridda hannaan sharci oo lagu fududeynayo helitaanka kaalmo-sharciyeed. Si kastaba, sharciga waxa uu ka tagay qodobo muhiim ah, waxaa sidoo kale ka muuqdo daldaloollo waaweyn oo si qoto dheer loogu falanqeyn doono qaybta soo socta.

[7] Qodobka 15aad
[8] Qodobka 16aad
[9] Qodobada 26, 33, 34
[10] Qodobada 18, 19,20, 21, 22, 24, 25, 26, 27, 28 iyo 29.
[11] Qodobka 37

## 4. Iska-horimaadka iyo daldaloollada Sharciga

Inkasta uu Sharcigu dhisayo hannaan cusub oo muhiim u noqon kara helitaanka caddaaladda, haddana qodobbadiisu waxay muujinayaan daldaloollo iyo iska-horimaadyo waaweyn oo taabanaya hannaanka maamulka, isu-duwidda awoodaha iyo xilalka, iyo habka fulinta sharciga. Daldaloolladaas haddii aan la xallin waxay si dhab ah u wiiqi karaan ujeeddadii sharcigu lahaa, waxayna dhalin karaan khilaaf joogto ah oo ka dhex dhasha hay'adaha dowladda, gaar ahaan guddiyada uu sharcigu dhisayo iyo adeeg-bixiyeyaasha. Qodob kasta oo aan si cad u qeexin awoodda hay'ad ama guddi gaar ah leeyahay wuxuu xoojinayaa suurtagalnimada korarka khilaafaadka, is-dulsaarka waajibaadka iyo xilalka (overlapping mandate), iyo jahawareer muwaadinka oo ku saabsan cidda masuulka ka ah adeegga kaalmo-sharciyeedka ee uu xaqa u leeyahay.

Daldaloollada iyo iska-horimaadyada qodobada Sharciga waxaa kamid ah;

1. **Isdulsaar la xiriira awoodaha Iyo xilalka guddiyada labada heer**: Sharciga isaga oo ka jawaabaya nidaamka federaalka ee dalka ayuu abuurey guddiyo laba heer ah oo isugu jira Guddiga Kaalmo Sharciyeedka Federaalka Iyo Guddiga Kaalmo Sharciyeedka Dowlad Goboleedka Iyo Gobolka Banaadir, hasayeeshee waxa uu si weyn ugu guuldarreysta kala caddaynta awoodaha labada heer. Sharciga, gaar ahaan qodobadiisa 26, 33 iyo 34 oo si wadajir ah uga hadlaya awoodaha iyo xilalka "Guddiga" ma cada cidda sida gaarka u leh awoodaha iyo xilalka ku xusan qodobadaas, madaama la adeegsadey kaliya ereyga "Guddiga' oo aan la qeexin guddiga sida gaarka ah looga jeedo qodobadaas. Sharciga, habayaraatee, kuma jira qodob si cad u kala saaraya mas'uuliyadda federaalka iyo tan dowlad-goboleedyada, awoodaha iyo kaalinta Guddi walba ee la xiriirta fulinta adeegga kaalmo sharciyeedka. Sidaa darteed, caddeyn la'aanta jihada leh awoodaha la xiriira dejinta siyaasadda kaalmo-sharciyeedka, kormeerka iyo aqoonsiga adeeg-bixiyeyaasha, iyo horumarinta tilmaamaha adeeg bixinta iyo tallaabooyinka kale ee ku cad sharciga waxa ay xoojinayaan suurtagalnimada isqabqabsi iyo isku dhac toos ah oo ka dhasha fulinta sharciga.

2. **Xafiiska Kaalmo Sharciyeedka:** Sharciga, isaga oo dhisaya Guddiyo laba heer ah oo mas'uul ka ah hagidda siyaasadaha, kormeerka adeegga, iyo aqoonsiga adeeg-bixiyeyaasha, hadane Sharcigu waxa uu sidoo kale abuuraya "**Xafiiska kaalmo Sharciyeedka**". Hasayeeshee, sharcigu ma qeexayo shaqada xafiiska, awoodaha uu leeyahay, mas'uuliyadaha uu fulinayo, ama xiriirka maamul ee u dhexeeya xafiiskan iyo guddiyada. Ma cadda in Xafiisku hoos yimaado guddiga, in uu yahay garab madaxbannaan oo fulineed, ama in uu yahay xafiis ay si wadajir ah u maamulaan Wasaaradda Cadaaladda iyo guddiyada. Dhanka kale, arrinta jahawareerka ugu weyn leh waxa ay ka muuqataa qodobka 31aad oo ah qodobka kaliya ee si toos ah u xusaya axkaam gaar u ah Xafiiska, waxa uu dhigaya in "Xafiiska ka koobanyahay Xoghyaha Guddiga Iyo hawl-wadeenno katirsan

Wasaaradda Cadaaladda" taas oo ah isku-milan aan qeexnayn oo u dhexeeya Guddiyada, Xafiisyada, iyo Wasaaradda Cdaaladda.

3. **Guddiga Kaalmo Sharciyeedka Gobolka Banaadir Iyo Guddiga Federaalka:** Sharcigu waxa uu Gobolka Banaadir ula dhaqmayaa sidii dowlad-goboleed oo kale, isaga oo siinaya awood la mid ah tan guddiyada dowlad-goboleedyada, waxaana Qodobka 16aad lagu dhisayaa Guddiga Kaalmo-Sharciyeedka Gobolka Banaadir oo leh shaqooyin la mid ah kuwa guddiyada dowlad-goboleedyada kale. Hasayeeshee, xaqiiqda ah in Guddiga Federaalka iyo Guddiga Gobolka Banaadir ay labaduba ku wada shaqaynayaan hal magaalo oo ah Muqdisho, isla markaana labaduba ay awood u leeyihiin dhismaha Xafiis Kaalmo-Sharciyeed, soo saarista tilmaamaha adeegga, iyo kormeerka adeeg-bixiyeyaasha ku sugan caasimadda, waxa ay abuuri doontaa culeys maamul iyo mid sharci oo toos ah, maadaama sharcigu uusan kala caddeyn awoodaha labada guddi, tan waxa ay horseedi doontaa jahawareer ku saabsan hay'adda uu adeeg-bixiyaha Muqdisho ku sugan la shaqaynayo, ama hay'adda dejinaysa halbeegga uu u hoggaansamayo, iyo cidda leh kormeerka iyo la-xisaabtanka rasmiga ah ee adeeg-bixiyeyaasha deggan Muqdisho.

4. **Mugdi la xiriira diiwaangelinta ama idmashada (accreditation) hay'adaha bixiya kaalmo sharciyeedka:** Sharciga waxaa si cad uga muuqda mugdi la xiriira diiwaangelinta iyo idmashada hay'adaha bixiya kaalmo-sharciyeedka, maadaama qodobbo kala duwan ee sharciga ay si is-khilaafsan u tilmaamayaan hay'adaha leh awoodda rasmiga ah. Qodobka 33aad iyo Qodobka 34aad waxay sheegayaan in guddiyada ay khuseyso ay bixiyaan idmashada iyo kala noqoshadiisa, halka Qodobka 10aad uu dhigayo in hay'adaha bixiya kaalmo-sharciyeedka ay iska diiwaangeliyaan kana haystaan rukhsad Wasaaradda Cadaaladda. Arrintan waxa ay si toos ah u abuuri doontaa jahawareer maamul oo la xiriira hay'adda ay oggolaanshaha ka qaadan doonaan hay'adaha bixiya kaalmo sharciyeedka.

5. **Maqnaanshaha Faahfaahin Iyo Habraacyo:** Inkasta uu Sharcigu dejinayo mabaad'ida iyo noocyada adeegyada kaalmo sharciyeedka, haddana waxa uu abuuray daldaloolo ballaaran oo la xiriira habka loo fulinayo adeeggan iyo habraacyada lagu maamulayo, gaar ahaan, sharcigu ma daboolin;

   a) Qodobada ku saabsan codsiga kaalmo-sharciyeedka, qiimeynta codsiyada, go'aaminta u-qalmitaanka kaalmo sharciyeedka, habka loo qaabilayo codsiyada degdegga ah, sida loo kala hormarinayo kiisaska dadka nugul, iyo muddada lagu soo saarayo go'aannada aqbalidda iyo diidmada.
   b) Nidaam faahfaahsan oo lagu aqoonsado laguna diiwaangaliyo adeeg-bixiyeyaasha kaalmo-sharciyeedka, sida qareennada, ururrada bulshada, jaamacadaha, iyo hay'adaha ama shakhsiyaadka kale ee ku xusan xeerka.

## 5. Gunaanad iyo Talo-soojeedin

Sharciga Kaalmo-Sharciyeedka JFS waa tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka ballaarinta helitaanka caddaaladda, waxaana uu iftiiminayaa rabitaanka in la abuuro nidaam qaran oo dadka saboolka ah iyo kuwa nugul u fududeynaya helidda taageero sharci oo hufan. Si kastaba ha ahaatee, sida falanqaynta hore muujisay, sharcigu waxa uu leeyahay daldaloollo sharci, iska-horimaad, iyo mugdi maamul oo u baahan in loo wajaho si degdeg ah si looga hortago caqabado ka dhalan kara hirgelintiisa. Haddii aan si taxaddar leh loo sixin, dhibaatooyinkaas waxa ay horseedi karaan isku-qabsi awoodeed, isku-dheelitirnaan la'aan adeeg, iyo jahawareer ku saabsan cidda leh awoodda sharciyeed ee bixinta adeegga kaalmo-sharciyeedka.

Talooyinka soo socda ayaa gacan ka geysan kara in sharcigu noqdo mid la hirgelin karo oo wax-ku-ool ah, isla markaana wax ku biiriya dadaallada lagu hagaajinayo helitaanka caddaaladda ee Soomaaliya:

1) **In xilli hore lagu baraarugo khatarta sharci iyo maamul ee ka dhalan karta is-dulsaarka awoodeed labada guddi:** Waxaa muhiim ah in xilli hore lagu baraarugo khatarta sharci iyo maamul ee ka dhalan karta awoodaha isu-duwid la'aanta awoodaha guddiyada heer federaal iyo heer dowlad-goboleed. Waxaa habboon in si cad loo qeexo awoodaha iyo mas'uuliyadaha guddi kasta. Waxaa la tixgelin karaa in la abuuro hal Guddi Qaran oo mideeya siyaasadaha, hagidda adeegga, iyo dejinta halbeegyada, halka guddiyada heer gobol iyo gobolka Banaadir ay u qaabilsan yihiin fulinta adeegga oo keliya.
2) **In la dardargeliyo soo saarista xeer-nidaamiyeyaasha iyo habraacyada lama huraanka u ah hirgelinta sharciga**: Maadaama sharcigu ka tagayo faahfaahinta muhiimka ah ee la xiriirta codsiga kaalmo sharciyeedka, u-qalmitaanka, habka qiimeynta, kormeerka, la-xisaabtanka, iyo nidaamka aqoonsiga adeeg-bixiyeyaasha, waxaa lagama maarmaan ah in Wasaaradda iyo guddiyada ay isla markiiba soo saaraan xeer-nidaamiyeyaasha iyo tilmaamaha lagu hagayo adeeg bixinta, iyada oo la mideynayo jihada awoodda u leh aqoonsiga hay'adaha bixiya adeegyda kaalmo sharciyeedla
3) **In la abuuro istaraatiijiyad ama Siyaasad Qaran oo lagu xaqiijiyo helitaanka adeegga kaalmo-sharciyeedka:** Waxaa habboon in dowladda ay dejiso qorshe qaran oo qeexaya sida adeeggu u gaari doono dadka ku nool degmooyinka fogfog, xeryaha barakacayaasha, xarumaha haynta, xabsiyada, iyo saldhigyada booliiska.
4) **Kordhinta Dedaallada wacyigalinta:** Waxaa muhiim ah in la xoojiyo wacyiga bulshada, gaar ahaan dadka nugul sida haweenka, carruurta, dadka barakacayaasha ah, iyo bulshooyinka leh helitaan xaddidan oo adeegyo sharci ah. Wacyigelinta joogtada ah ee ku saabsan xuquuqda sharciga, waajibaadka, iyo sida loo heli karo kaalmo-sharciyeedku waxay kaalin muuqata ka qaadan kartaa dhimista caqabadaha hortaagan helitaanka caddaaladda.